# DHIRTA IYO CAYAYAANKA

(Planter og insekter)

Waxa hubaala in aad aragtay ubaxa layiraahdo hvitveis ee soo baxa horaanta xilga guga uu bilaabanaayo- Meelo badan oo kaynta gunteeda ah waxa daboola ubaxan caddaanka ah, taas uu astaan u ah in waqtigii samarku soo dhowyahay. Ubaxan hvitveisku aad ayuu u qurxoonyahay, laakiin waa sun. Sida geedokale oo badan hvitveisku waxa uu caleentiisa ku sameeyaa sunn, taas oo uu iskaga difaaco cayayaanka iyo xayawaanku si ayna u cunin. Laakiin khatar maaha in ubaxa hvitveiska la soo gurto, haddii aad ubaxa jidhkaaga iyo afkaaga ka ilaalisid.



*Sawirka 1aad. Hviteveis. Xigasho: Pixabay.com*

geedkani waxa uun uu ka baxaa kaliya meelaha dhulka carradiisu nafaqo badan leedahay, aanay furfurantahay ama jilicsantahay. Ubaxa blåveisku uma adkaysto qabowga, sidaa darteed kuma badna Noorway, inkasta oo meelo badan lagu arko. Haddii aad rabto in aad soo gurato ubaxa blåveiska, xididka ha goyn ee ciidda ku dhaaf si uu ubax cusub uga soo baxo. Meelaha qaar dadku waxay gooyaan ilaa xididka taas oo keentay in ubaxa blåveisku halkaas ka dabar og,ay. Blåveis mak a baxaa halka aad dagantahay?

Ubaxu waxa uu muhiim u yahay geedka naftiisa, waayo waa meesha ay abuurka(siidhka) lagu sameeyo. Si uu ubaxa blåveisku u sameeyo abuur  waa in dhas yar oo la yiraa *pollen,* laga soo qaadaa geeg iyadoo loo qaadayo geedka kale. Blåveiska cayayaan ayaa shaqadan u qabta oo pollenka ka qaada geed  una geeya geedka kale.



*Sawirka 2aad Blåveis. Xigasho: Pixabay.com*

Wakhtiga guga waxa aad aragtaa in biyo qabatinnada iyo harooyanku ay noqdaan jaalle. Waxa weeye *pollen* ka soo daadatay ubaxyo kala duwan oo faafaysa. Dadka qaar xasaasiyad ayey ka qabaan polanka, way qufacaan, hindhisaan indhuhuna way cuncunaan.

Cayayaan badan ayaa ayaa dul joogsada blåveiska ubaxiisa iyagoo pollenka cunaya. pollen badan ayey cagaha iyo jirka ku sii qaadaan marka ay ka tagayaan iyaga oo polenka cagahooda iyo jirkooda saaran geynaya geedkale.  polenku waxa uu mihiim uyahay in ubaxu sameeyo abuur ama siidh. Marka uu abuurku diyaarka noqdo ubaxu wuu qalalaa, abuurkuna  banaanka ayuu u dalaandashaa. Abuurka dushiisa waxa fadhiya dhibco yaryar oo saliid ah oo ay quraanjadu jeceshahay. Sidaa darted quraanjadu waxay abuurka u qaadataa dundumadeeda. Laakiin waxa dhacda inta badan in ay dhumiyaan abuurka inta ay dhexda sii socdaan. habkan ayuu blåveisku ugu faafaa meelo kale oo cusub.



*Sawirka 3aad Marihøne. Xigasho:Pixabay.com*

## Cayayaanka

Cidi ma uga tirade xayawaanada kala duwan ee aduunka korkiisa ku nool. Ilaa hadda khubaradu waxaa ay heleen ilaa malyuun nooc oo xayawaan ah. Laakiin intaa in ka badan oo weli aan la helin ayaa jira. kuwan badankooduna waa cayayaan. cayayaanka waxa u badan *billene.* Marihøner iyo oday fuulfuulku waa *biller.* Waxa laga yaabaa in aad dareentay in ay jiraan qaybo kala duwan oo marihøner ah. waxa jira noocyo kala duwan oo marihøner ah. Gacanta maku qabatay marihøner? Malaha waad dareentay urta uu bixiyo. Waxay ka timaadaa dhibco adag oo ii sii daayo si uu isku difaaco. Waxanay uraan qurmuun. Haddii ay shimbir isku daydo in ay cunto marihøne waxa ku dhaca lama filaan urta ah. Marka danbe ee shimbirtu aragto marihøna ma hungurayso ee way iskaga tagtaa. Sidaa darted muhiim ayey marihøneda u tahay in si fudud loo arko. Dhibcaha iyo midabada xoogan marihønedu lee dahay ayaa cabsi gelisa shimbiraha.



*Sawirka 4aad Oday fuulfuul. Xigasho:Pixabay.com*

Qayb wayn oo cayayaanka kamid ah ayaa iyana ah Balanbaalista.. Waxa hubaal ah in aad aragtay qaybo badan oo balanbaalis ah oo kala duwan. Noorway wax ku nool in ka badan lba kun oo nooc oo balanbaalis ah. Waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo waaweyn: Balanbaalisaha maalintii iyo balanbaalisaha habeenkii. Ballanbaalisaha maalintu, maalintii ayey duulaan halka balanbaalisaha habeenku, habeenkii ka duulaan. Marka ay balanbaalisaha maalintu nasanayaan labada baal ayey isku keenaan. Halka balanbaalisaha habeenkii ay kala bixiyaan marka aynasanayaan. Qaar ka mida balanbaalis maalmeedk baalashooda waxa ku xardhan midabo aad u quruxbadan . Mid ka midihi waa *dagpåfugløya.*



*Sawirka 5aad Balanbaalis. Xigasho:Pixabay.com*

Ballanbaalisuhu waxay dhalaan ukun, marka ay qaraxdo dirxi ka soo baxo . Dirxigu inta uu korayo dhow mar ayuu diirka sarey iska badalaa ama qolof dhacsadaa. dhowr wig ka bacdina waxa uu noqdaa ballanbaalis. Inta aanay duulin waa in baalashu qalalaan si ay u raadsato cunto. Inta badan balanbaalisah waaweyni waxay waxa ay ka soo nuugaan ubaxa biyo sonkoreed taas oo ay cunto ahaan u isticmaalaan. Dhibcaha waaweyn eek u yaala baalasha dagpåfugløya ayaa sababay in magacaa loogu yeedho, sida aynu aragno dhibcuhu waxa ay u egyihiin indho. Shimbiraha ugaadhsanya ee cunto daydayayaa, wax kale ayey u malaynayaan marka ay arkaan dhibcaha indhaha u eg oo way iskaga tagaan.

Marka uu wintarku soo galo Noorway way dhintaan int badan balanbaalisuhu. Dirxiga ayaa noolaada winterka, laakiin dagpåfugløya ma dhimato iyadu ee waqtiga barafku jiro oo dhan waxay ku dhuumataa god. marka uu gugu soo galo ee barafku dhalaalo ayey soo baxdaa oo duushaa. Sida darted  dagpåfugløya waa balanbaalisaha ugu horeeya ee aynu ugu hor aragno waqtiga guga.

## Quraanjada

Quraanjadu waxa ay ka mid tahay faamligg ugu xayawaanada ee layiraa cayayaanka. In kabadan kala bar xayawanka dunidu waa cayayaan. Kumaankun nooc oo quraanjo ah ayaa aduunka guudkiisaku nool. Konton nooc oo ka mid ahi waxay ku noolyihiin Noorway.


Skogmaurene ama quraanjada kayntu waa nadiifiyeyaasha kaynta. Waxay cunaan cayayaanka dhintay ama jirran, waxayna faafiyaan abuurta geedaha., waxanay cunto uyihiin xayaanu badan oo kaynta ku nool. Shimbiraha la yiraahdo hakkesperett dundumada afkeeda ayey qoddaa si ay quraanjada u cunto. Dawacada iyo gaduudanaha naftirkoodu dundumada way qodaan si ay quraanjada ula soo baxaan.

Quraanjada oo dhami waxay ka koobantaha seddex qaybood:

1. Boqoradda (oo ah ta ukunta dhasha)
2. Shaqaalaha (shaqaalahu waa dhedig laakiin ukun madhigaan)
3. Nimanka (nimanku iyagu baalal ayey leeyihiin ay ku duulaan, boqorada naftirkeedu waxa ay leedahay baalal, waxay duushaa kali ah marka ay rimayso oo ay hawada ku rinto ama nimanka oo duulaya ay kula kulanto hawada iyada oo duulaysa).

Boqoradda quraanjadu waxa ay noolaan kartaa labaatan sanno. Cayayaan kale oo la ogyahay oo noolaan kara intaasi ma jiro.

Nooc ka mida quraanjada ku nool Noorway ayaa waxay qoraanjooyinka kale ka soo xaddaa ugxantooda waxana loo yaqaan Tyvmaur ama tuugga quraanjada.



*Sawirka 6aad Boqorad. Xigasho:Pixabay.com*

## Erayo barasho

| Norsk | Somali |
|---|---|
| Planter | dhir |
| Skog | kayn |

| Norsk | Somali |
|---|---|
| Hitveis | Waa ubax cad oo guga horaantiisa soo bax |
| Blåveis | Waa ubax bluug ah |
| Gift | sunn |
| Rota | xididka |
| Frø | Abuurta/siidhka |
| Insekter | cayayaan |
| Balanbaalis | sommerfugl |
| Vingene | baalasha |
| Maurtua | dundumo |
| Maurtyv | Tuug quraanjo |